# Taariikhda Waxqabadka Caafimaadka ee CISP’s

| | |
|---|---|
| 1983 | CISP ayaa sahan ku sameysey xaaladda caafimaad ee degmada Jilib (Jubbada Dhexe) |
| 1986 | CISP ayaa hawsheeda ka bilowdey Soomaaliya - magaalooyinka Jilib iyo Jamaame (gobollada Jubbada Dhexe iyo Jubbada Hoose) iyada oo ku bilowdey barnaamij caafimaad. |
| 1986<br>1991 | CISP ayaa dowladda ka taageertey mashruuc cudurka juudaanka ku saabsan iyo xarumo kuwa hooyada iyo dhallaanka ah (mashruuc 10 sano loogu talogaley oo u joogsadey dagaalkii sokeeye ee qarxay daraaddii) |
| 1991 | Markii uu bilowdey dagaalka sokeeye ayaa dhammaan tas-hiilaadkii caafimaadka ee ay taageersey CISP la bililiqeystey |
| 1992 | CISP ayaa xafiis isuduwid ka furtey Nayroobi (Kenya), si ay u qabanqaabiso hawlo wax looga qabanayo dhibaatooyinka |
| 1992<br>1995 | CISP waxa ay barnaamij nafaqeyn ah ka waddey 15 Xarumaha Caafimaadka Hooyada iyo Dhal-laanka ah (MCH) oo ku yaalley Muqdisho (Gobolka Banaadir) |
| 1995 | CISP ayaa daraaseyn ku sameysey cusbitaalka Ceel Dheer (Gobolka Koonfurta Galgaduud) |
| 1995<br>2002 | CISP ayaa dhistey gegida dayuuraduhu ku degaan ee Ceel Dheer (Koonfurta Galgaduud) waxaana ay bilowdey in ay taageerto cusbitaalka Ceel Dheer (dib-u-dhisid, qalabeyn, shaqaale u qoris, tababar shaqaale, bixinta daawooyinka, dhisidda Guddi Caafimaad Bulsho iyo nidaam xog ururin) |
| 1997 | CISP waxaa ay dhistey ayna taageertey cusbitaalka Xarardheere (Gobolka Mudug) muddo lix bilood ah. Maaliyad-siinta cusbitaalka waxaa la wareegey bulshada, iyaga oo taageero ka helaya Qurba-joogga. |
| 2003<br>2009 | CISP waxa ay taageertey Cusbitaallada Ceel Dheer iyo Xarardheere, iyada oo ay weheliyaan bulshada degaanka |
| 2004<br>2008 | CISP waxa ay barnaamij wax ka qabashada duumada ah ka bilowdey cusbitaallada Ceel Dheer iyo Xarardheere. |
| 2006 | - CISP waxaa ay waddey barnaamij Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah waxaana ay taageertey 7 MCH<br>- CISP waxaa ay barnaamij wax ka qabashada Qaaxada iyo HIV ka bilowdey cusbitaallada Ceel Dheer iyo Xarardheere. Barnaamijyadu ilaa hadda waa ay socdaan. |
| 2008 | CISP waxaa ay dayactirtey Cusbitaalka Forlanini ee Muqdisho, waxaana ay hawshiisa waddey ilaa ay maliishiyaad ka qabsadeen sanadkii 2009kii |
| 2009 | CISP waxaa ay taageertey qaybta umulaha ee cusbitaalka Dhuusamarreeb, iyo afar Xarumaha Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka ah oo ku yaalla Waqooyiga Galgaduud |
| 2010<br>2011 | CISP waxaa ay hadda ka shaqeyneysaa gobollada Galgaduud iyo Mudug, iyada oo bulshooyinka degaanka iyo maamullada degaanka kala shaqeyneysa taageeridda:<br>- Saddex cusbitaal oo ku kala yaalla Ceel Dheer, Xarardheere iyo Dhuusamarreeb (oo gaara ilaa 150,000 sanadkiiba),<br>-15 MCH (216,000 bukaan sanadkii),<br>- Barnaamijyo kala duwan oo lagu gaarey 8,000 carruur ah iyo 8,000 haween ah. |